Tallaalka cagaarshow B

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Ka eeg www.immunize.org/vis.

Hojas de Información Sobre Vacunas están disponibles en Español y en muchos otros idiomas. Visite http://www.immunize.org/vis

1 Waa maxay cagaarshowga B?

Cagaarshow B waa infekshan daran oo ku dhaca beerka. Waxa keena fayraska cagaarshow B.

- Gudihii 2009, qiyaastii 38,000 oo qof ayuu ku dhacay cagaarshow B.
- Sannad kasta 2,000 ilaa 4,000 oo qof ayaa u dhinta gudaha Mareykanka seroosis ama kansarka beerka ee uu sababo cagaarshow B.

Cagaarshow B wuxuu sababi karaa:

Xanuun (muddo-gaaban) oo daran. Taasi waxay u horseedi kartaa:

- cunto rabitaan la'aan
- daallanaan
- xanuun muruqyada, kalagoysyada, iyo caloosha ah
- shuban iyo matag
- indha caseeye ama jooniska (maqaarka ama indhaha oo hurdi noqda)

Xanuun gaaban oo daran, oo leh calaamado wuxuuna ku badan yahay dadka qaangaarka ah. Carruurta uu ku dhaco inta badan ma yeeshaan calaamado.

Xanuun (muddo dheer) oo joogto ah. Dadka qaarkood ayuu cudurka cagaarshowga B ee joogtada ah hadhow u ku dhacaa. Badidoodu ma leh calaamado, laakiin infekshanku wali waa mid daran, oo wuxuu u horseedi karaa:

- burburka beerka (cirrhosis)
- kansarka beerka
- dhimasho

Infekshanka joogtada ahi wuxuu kaga badan yahay ilmaha sabiga ah iyo carruurta marka loo eego qaan-gaarka. Dadka uu sida joogtada ah u hayo infekshanku waxay ku faafin karaan dadka kale, xiitaa haddii aanay u muuqan qaar buka ama aanay dareemin xanuunka. Illaa 1.4 milyan oo dad ah ayaa laga yaabaa Mareykanka inay leeyihiin cudurka cagaarshowga B ee joogtada ah.

Fayraska cagaarshow B wuxuu ku faafaa istaabashada dhiigga ama dareerayaasha kale ee qofka qaba cudurka. Dadka ayaa waliba ku qaadi kara cudurka taabshada sheyada faddareysan, oo u fayrasku ku noolaan karo illaa 7 maalmood.

- Ilmaha hooyadii u cudurku hayo ayaa cudurka qaadi kara markuu dhalasho;
- Carruurta, da' yarta, iyo qaan-gaarka ayaa ku qaadi kara cudurka iyagoo:
  - taabto dhiig iyo dareerayaasha jidhku markuu dilaaco maqaarku sida qaniinyada, jeexanka, ama nabarrada;
  - taabashada walxaha leh dhiig ama dareerayaasha jidhka sida cadayga ama makiinadaha; ama aaladaha ka warhaynta iyo daaweynta sonkorowga;
  - galmo aan ilaashanayn oo lala qaato qof qaba cudurka;
  - wadaagga irbadaha marka uu isku mudayo darooga-da qofku;
  - marka qofka lagu muddo irbad la isticmaalay.

2 Tallaalka cagaarshowga B: Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

Tallaalka cagaarshow B ayaa ka hortagi kara cagaarshow B iyo natiijooyinka halista ah ee ka yimaada cudurka cagaarshow B, kuwaas oo ay ka mid yihiin kansarka beerka iyo burburka beerka (cirrhosis)

Tallaalka cagaarshow B ayaa qofka la siin karaa kaligee ama la raacin karaa isla duritaanka tallaallada kale.

Tallaalka cagaarshow B ee caadiga ah waxa loo gartay Mareykanka dadka qaarkood ee qaan-gaarka ah iyo carruurta laga soo bilaabo 1982, carruurtana 1991. Laga soo bilaabo 1990, cudurrada cagaarshow B ee cusub ee ku dhaca carruurta iyo dhowr iyo toban jirka ayaa hoos uga dhacay in ka badan 95% – iyo illaa 75% kooxaha da'aha kale.

Tallaalada ayaa bixinaya kahortag cagaarshow B oo muddada dheer ah, oo laga yaabo suurtagal ahaan ci-mirga oo idil inay noqoto.

3 Ayaa ah inuu qaato tallaalka cagaarshow B waana goorma?

Carruurta iyo dhowr iyo toban jirka

- Ilmaha sabiga ah ayaa sida caadiga ah hela 3 qiyaas-ood oo tallaalka cagaarshow B:

Qiyaasta (Dose)	1-aad	Dhalashada
Qiyaasta 2-aad	1-2 bilood jir	
Qiyaasta 3-aad	6-18 bilood jir	

Ilmaha sabiga ah qaarkood ayaa dhici karta inay qaataan 4 qiyaasood, tusaale ahaan, haddii la isticmaalo tallaalka isku-jira oo wata ka cagaarshow B. (Kani waa duritaan ay ku jiraan tallaalo dhowr ah.) Qiyaasta dheeraadka ahi waxyeello ma laha.

- Qof kasta illaa 18 jirka ee aan qaadan tallaalka markay yaraayeen ayaa waliba ah in la tallaalo.

Qaangaarka

- Dhammaan dadka waawayn ee aan tallaalnayn ee khatar ugu jira qaadidda cudurka cagaarshow B waa in la tallaalo. Kuwaas waxa ka mid ah:
  - rafiiqyada galmada ee dadka uu ku dhacay cagaar-show B,
  - ragga u taga ragga,
  - dadka isku muda daroogada suuqa,
  - dadka leh in ka badan hal rafiiq oo galmo,
  - dadka leh cudur ku raagay beerka ama kalida,
  - dadka ka yar da'da 60 sano ee leh sonkorowga,
  - dadka ka shaqeeya shaqo u bandhigan dhiigga dadka ama dareerayaasha jirka ee kale,
  - taabashada alaabada guriga ee dadka u hayo cudurka cagaarshow B,

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

- deggenayaasha iyo shaqaalaha machadka dadka korniin ahaan naafada ah,
- bukaanada kaadi-sifeynta kelyaha lagu sameeyo,
- dadka u socdaala waddamada cagaarshowga B ku badan yahay,
- dadka leh infekshanka HIV.

- Dadka kale ayaa waxa laga yaabaa inuu dhakhtarkoodu ku dhiirigaliyo inay qaataan tallaalka cagaarshowga B; tusaale ahaan , waayeelka 60 jira iyo kuwa ka weyn ee qaba sonkorowga. Cid kasta oo rabta inay ka hortagaan cudurka cagaarshowga B ayaa qaadan karta tallaalka.
- Haweenka uurka leh ee halista u ah midkood sababaha kor lagu sheegay ayaa ah in la tallaalo. Haweenka kale ee uur leh ee raba inay kahortag yeeshaan ayaa la tallaali kara.

Dadka qangaarka ah ee qaadanay tallaalka cagaarshow B waa inay qaataan 3 qiyaasood oo qiyaasta labaad la siiyo 4 usbuuc kadanbow midka hore ka saddexaadna waa in la siiyo 5 bilood kadanbow ka labaad. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi kara arrimaha ku saabsan jadwallada kale ee qiyaasaha tallaalka ee laga yaabo in loo istcimaalo xaaladaha qaarkood.

4 Ayaa ah ineyna qaadan tallaalka cagaarshowga B?

- Qof kasta oo xasaasiyad nafta-halis galisa u leh khamiirka (yeast), ama wax kale oo tallaalku ka kooban yahay, ayaa ah inayna helin tallaalka cagaarshowga B. Waxaad u sheegtaa dhakhtarkaaga haddii aad leedahay aleerjiyo ama xasaasiyado daran.
- Ciddii mar hore ku yeelatay ama ka qaaday falgal dareen-celin ama xasaasiyad nafta halis u ah qiyaas tallaal cagaarshow B waa inayna qaadan tallaal kale.
- Qof kasta oo in yar ama si daran u jirraysan wakhtiga ballanta loo qabtay qiyaasta tallaalka ayaa laga yaabaa inay u baahan yihiin inay sugaan illaa ay ay ka soo kabanayaan kahor inta aanay qaadan tallaalka.

Dakhtarkaaga ayaa macluumaad dheeraad ah kaa siin doona.

Fiiro gaar ah: Waxa laga yaabaa in lagu weydiisto inaad sugto 28 maalmood kahor intaadan cid ku deeqin dhiig kadib markaad tallaalka cagaarshowga qaadato. Sababta ay sidaa u tahay waa iyada oo tijaabada baaritaanku ku khaldami karo tallaalka ku jira dhiiga (kaas oo aan cudur keenin) inuu yahay infekshanka cagaarshowga B.

5 Waa maxay halista ka iman karta tallaalka cagaarshowga B

Tallaalka cagaarshowga B waa mid aad ammaan u leh. Dadka inta ugu badan ayaysan dhibaato uga iman.

Tallaalka waxa ku jira walax aan cudur-lahayn, oo ma sababi karo cudurka cagaarshowga B.

Dhibaatooyinka qaarkood ee sahalan ee laga warbixiyay.

- Damqasho barta qofka laga tallaalay (qiyaastii illaa 1 qof 4-tiiba).
- Heerkul ah 99.9°F ama ka badan (qiyaastii illaa 1 qof 15-kiiba).

Dhibaatoyinka darani aad ayay dhif u yihiin. Dareen-celinta xasaasiyadeed ee daran ayaa la aamminsan yahay inay dhacdo qiyaastii hal mar marka la eego 1.1 milyankii qiyaasood ee tallaal.

Tallaalka, sida daawo kasta, ayaa suurtagal ah inuu sababo dareen-celin halis ah. Laakiin halista uu tallaalka ku keeni karo dhibaato culus, ama geeri, ayaa aad u yar. In ka badan 100 milyan qof ah baa gudaha Mareykanka la siiyay tallaalka cagaarshowga B.

6 Maxaa la samaynayaa haddiiba ay jirto dareencelin dhedhexaad ah ama daran?

Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?

- Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida xummad badan ama dhaqanka qofka oo isbeddela. Calaamadaha dareen-celinta xajiinta/ alerjiyada daran waxaa ka mid ah neefsashada oo dhib ah, xabeeb ama hinraagid, furuuruc cuncun leh, midabka oo qofka sii cadaada, wadne garaac badan ama dawakhsanaan.

Maxaan sameeyaa?

- **Wac** dhakhtar, ama qofka dhakhtarka ku gee isla markiiba.
- **U sheeg** dhakhtarkaaga waxa dhacay, taariikhda iyo waqtiga ay dhacday, iyo markii tallaalka la qaatay.
- **Weydiiso** dhakhtarka, kalkaaliyaha, ama waaxda caafimaadka inay ka warbixiyaan dareen-celinta iyaga oo buuxiya warqadda Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS). Ama waxaad ka faylgarayn kartaa warbixintan websaaydka VAERS ee ku yaal **www.vaers.hhs.gov**, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

VAERS ma bixiso talo caafimaad.

7 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (VICP) waxaa la abuuray badhtameeyihii sannadkii 1986.

Dadka rumaysan inuu tallaal dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyagoo wacaya **1-800-338-2382** ama booqanaya websaaydka VICP **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**.

8 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan u ogaan karaa?

- Weydiiso dhakhtarkaaga, wuu ku siin karaa xirmo qoraal oo ku saabsan tallaalka ama kugula talin karaan ilo kale oo aad macluumaad ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka xaafadda ama gobolkaaga.
- La Xidhiidh Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurada (CDC):
  - Waxaad wacdaa **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
  - Waxaad booqataa bogga internetka ee CDC **www.cdc.gov/vaccines**

Translation provided by the Immunization Action Coalition